

Xeerarka shaqo ka maqnaanshaha, oggolaansho fasax (permisjon) iyo fasax

In laga maqnaado barmaamijka hordhaca (introduksjonsprogram) xeerarka khuseeyaa waxey inta badan la mid yihiin kuwa khuseeya shaqada caadiga ah. Marka laga reebo in aanaad noqon karin qof kala badh ugu maqan xanuun dartii (delvis sykemeldt). Markey noqoto xeerarka dhinaca oggolaansho fasax waxa loo sameeyey qiilal u gaar ah dadka ka qeyb qaadanaya barmaamijka hordhaca kuwaaas oo ka duwan kuwa khuseeya shaqooyinka caadiga ah.

Haddii aad xanuunsaneyso oo aanad imaneyn waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u wargeliso degmada, macallinka ama goobta aad ugu joogto tabobarka..

Haddii aad u maqnaato si la oggol yahey xaq ayaad u leedahey inaad qaadata caawimada lagugu siiyo barmaamijka hordhaca. Haddii aanad isticmaalin habka is-sheegidda (egenmelding), ama aanaad ku cadeyn karin maqnaanshahaaga warqad dhakhtar, ama aan lagu siin oggolaansho, waxa aad saacadihii ama maalmihii aad maqneyd lagaa goynayaa caawimada lagu siiyo. Waxa loo arkayaa maqnaansho aan sax ama sharci aheyn. Maqnaanshaha aan sharciga aheyn wuxuu keeni karaa inaad weydo xaq aad u leedahey inaad ka qeyb qaadata barmaamijka hordhaca iyo in lagu siiyo dhaqaalaha hordhaca.

Xanuun (Jirro)

Habka is-sheegidda ama caddeyn dhakhtar dartood waad uga maqnaan kartaa barmaamijka hordhaca, haddii xanuun ama dhaawac kaa joojinayaan inaad ka qeyb qaadata. Habka is-sheegida waxaad isticmaaleysaa adiga oo si qoraal ama af ka-sheegid ah ula xidhiidhaya degmada, rugta hordhaca, la taliyaha barmaamijka ama macallinka adiga oo ogeysiinaya inaad jirran tahay.

- Marka ugu horreysa ee aad xaq u leedahey inaad isticmaasho habka is-sheegida waa marka aad barmaamijka hordhaca ka qeyb qaadata 8 toddobaad. 8-da toddobaad ee ugu horreeya waa inaad heysato caddeyn dhakhtar haddii aanad ka qeyb qaadan kareyn barmaamijka xanuun darteed.
- Waxaad fursad u heysataa inaad isticmaasho habka is-sheegida 4 jeer muddo 12 bilood gudahood ah. Mid kasta oo habka is-sheegida ah wuxuu socon karaa ilaa 3 cisho.
- Haddii aad bukto in ka badan 3 cisho waa inaad heysato cadeyn dhakhtar. Tan oo kale ayaa khuseysa haddii aad xanuunsato ka dib markii aad isticmaashey 4 goor oo habka is-sheegida ah mudada gudaheeda.

Haddii aad leedahey mid ama laba carruur ah waxaad guriga joogi kartaa haddii uu ilmuhu buko ilaa 10 cisho muddo 12 bilood gudahood ah. Haddii aad leedahey carruur ka badan labo waxaad xaq u leedahey 15 cisho oo aad fasax ka tahey ka qeyb qaadashada barmaamijka marka caruurta kaa bukooto. Haddii aad keli ku tahey daryeelka ilmaha waxaad xaq u leedahey 20 cisho haddii aad leedahey mid ama labo carruur ah, iyo 30 cisho haddii aad carruur intaa ka badan leedahey. Xuquuqdan oo kale waxaad leedahey haddii qofka ilmaha kuu ilaaliyaa uu bukoodo. Haddii uu maqnaanshahaagu ka dheeraado ilaa 3 cisho waxey degmadu kaa dalban kartaa inaad soo caddeyso xanuunka ilmaha ama xanuunka qofka ilmaha kuu haya oo aad keento cadeyn dhakhtar.

Codsi oggolaansho fasax

Waxaad degmada ka codsan kartaa in lagu siin karo oggolaansho fasax samafal (velferdspermisjon) haddii tusaale ahaan aad rabto inaad u tagto dhakhtar ama dhakhtarka ilkaha, wareysi shaqo ama wax kale. Waxa kale oo aad codsan kartaa oggolaansho fasax samafal marka carruurta bilaabeyso dugsiga ama xannaanada carruurta ama qof kugu dhow uu dhinto iwm. Wixii war ah ee intaa ka badan waxaad ka heli kartaa la taliyahaaga dhinaca barmaamijkan.

Haddii aad keentid caddeyn dhakhtar waxaad xaq u leedahey inaad codsato in lagu oggolaado in lagaa fasaxo barmaamijka hordhaca ah haddii adiga ama ilmahaagu ay in badan bukoodaan. Waxaad heli kartaa oggolaansho aan lagu siin caawimo dhaqaale ilaa 1 sano.

Haddii aad dhalaysid waxa jira xeerar gaar ah oo khuseeya inaad hesho fasax iyo oggolaansho lagu siiyo caawimo iyo in lagu siiyo fasax iyo oggolaansho aan laheyn caawimo.

Aabbayaashu sidoo kale waxey leeyihiin xuquuq la xidhiidha dhalmada. La taliyaha barmaamijka ayaa ku siin kara wixii war lagama maarmaan ah.

Maalmaha nasashada- iyo ayaamaha ciidaha ah

Dhammaan dadku waa ka fasax barmaamijka hordhaca sabtiyada iyo axadaha.

Ayaamahan soo socdaa waa ayaamaha ciidaha ah Norway markaa ka qeyb qaadayaasha barmaamijka waa fasax: 1 iyo 17 mey, maalinta sannadka cusub, khamiista (skjærtorsdag), jimcaha (langfredag), iyo maalinta 2 aad ee ciida masiixiga ee la yidhaahdo påske, maalinta kale ee Kristi himmelfartsdag, maalinta 2aad ee ciida (pingsedag) iyo maalinta 1aad iyo 2aad ee kirismaska.

Haddii aanaad ka tirsaneyn kiniisadda Norway, waxaad markaa xaq u leedahey inaad fasax ka qaadato ka qeyb galka barmaamijka hordhaca taas oo aad leedahey caawimada dhaqaale ilaa 2 cisho sannadkii kuwaas oo la xidhiidha adiga oo u dabbaaldegayaa ciidaha diiniga ah. Markaa waa inaad 14 cisho ka hor sii ogeysiiso degmada.

Fasax

Sannad kasta waxaad xaq u leedahey 25 cisho oo fasax ah. Degmada ayaa go'aamineysa waqtiga la gebagebeynayo fasaxa. Waxaad xaq u leedahey caawimo dhaqaale inta aad fasaxa ku jirto.